# Codka Dhusamareb: Wadahadalka Muwaadiniinta Iyo Gudoomiyaha Degmada ee Caqabadaha Maamul

Farxaan Isxaaq Yuusuf

Faallo Kooban 44 | Maarso 2026


## Soo koobid

- Tan iyo markii la aasaasay maamulka dowladda hoose ee hadda ka jira degmada Dhuusamareb bartamihii 2022, wada-shaqaynta u dhexeysay maamulka degmada iyo muwaadiniinta ee arimaha maamulka dowladda hoose waxay ahayd mid xaddidan, taasoo dad badan oo magaalada deggan ka dhigtay kuwo aan ka warhayn go'aannada iyaga loo gaaro.
- Dowladda hoose waxay leedahay ilo dakhli oo aad u kooban, iyadoo keliya 11 ka mida 33 ilood oo dakhli oo la aqoonsaday ay hadda shaqeeyaan, kuwaasoo soo saara qiyaastii $20,000 ilaa $25,000 bishii.
- Dakhligan koobani wuxuu is weyn u wiiqay awoodda dowladda hoose ee bixinta adeegyada aasaasiga ah ee dadweynaha iyo daboolidda filashada muwaadiniinta.
- Dadka magaalada degani waxay walaac ka muujiyeen amni-darrada sii kordheysa, adeeg bixinta degmada oo hooseysa, dhibaatooyinka nadaafadda, iyo hufnaan la'aanta, taasoo caddeyn u ah baahida loo qabo iskaashi iyo wada-shaqeyn xooggan oo ay yeeshaan maamulka degmada iyo bulshada deegaanka.


### Ku saabsan Somali Public Agenda

Somali Public Agenda (SPA) waa hay'ad aan macaash doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.


### Ku saabsan qoraaga

**Farxaan Isxaaq Yuusuf** waa Agaasime Ku-xigeenka Fulinta iyo Agaasimaha Cilmi-baarista ee SPA.


**www.somalipublicagenda.org**

**© 2026 Somali Public Agenda**

## Hordhac

Degmada Dhuusamareeb waa xarunta maamulka gobolka Galgaduud isla markaasna ah caasimada Dowlad-goboleedka Galmudug. Magaaladu waxay caasimadda maamulka noqotay bilowgii hore ee dhismaha dowlad-goboleedka, kadib markii ergooyinka beelaha oo ku kulmay magaalada ay u doorteen inay noqoto caasimada dowlad-goboleedka (Wasuge & Yusuf, 2021).

Sikastaba ha ahaatee, maamulka cusub ee gobolka ayaa si kumeelgaar ah ugu shaqeynayey degmada Cadaado, kadib markii maleeshiyaadka Ahlu Sunna Waljamaaca ay ka saareen maamulka magaalada Dhuusamareeb oo ay la wareegeen gacan-ku-haynteeda. Xaaladda ayaa sidaas ku sii socotay ilaa horraantii 2018, markaas oo uu urur goboleedka IGAD garwadeen ka ahaa heshiis dhex maray Madaxweyne Axmed Ducaale Geelle "Xaaf" oo xilka kala wareegay Cabdikariin Xuseen Guuleed oo xilka isaga casilay sababo caafimaad awgood, iyo hoggaanka Ahlu Sunna Waljamaaca ee Dhuusamareeb (Wasuge Iyo Yusuf, 2021).

Inkastoo heshiis la gaaray, haddana maamul wax-ku-ool ah iyo xasillooni waarta si degdeg ah uma hirgelin. Taas beddelkeed, Dhuusamareeb waxay xuddun u noqotay khilaaf siyaasadeed oo u dhexeeyey Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo dowlad-goboleedka Galmudug ee fadhigiisu yahay Dhuusamareeb, gaar ahaan arrimaha la xiriira maareynta doorashooyinka dowlad-goboleedka. Sikastaba ha ahaatee xasiloonida magaalada ayaa soo hagaagtay kadib doorashooyinkii Galmudug ka dhacay Febraayo 2020, iyadoo ay wali jireen xiisad u dhexeysay maamulka cusub oo ay dowladda federaalku taageeraysay iyo Kooxda Ahlu Sunna Waljamaaca oo lumisay gacan-ku-heynta magaalada.

Dhuusamareeb waxaa maamulayey hoggaan degmo oo lasoo magacaabo, oo uu hoggaaminayo Guddoomiyaha degmada, isla markaana ay caawiyaan tiro yar oo mas'uuliyiin la magacaabay ah. Muddadaas awoodda maamulku waxay ahay mid xaddidan, mana ku shaqeynayn xafiisyo ku habboon, maadaama dhismayaashii dowladdu badankood ku burbureen ama dayacmeen sababo la xiriira colaadihii sokeeye ee muddada dheer socday. Taas oo keentay in maamullada degmadu ku guuldareysteen bixinta adeegyada dadweyne.

Xaaladda ayaa si tartiib tartiib ah usoo hagaagaysay kadib doorashooyinkii Febraayo 2020, markaas oo dowladda Galmudug ay awood u yeelatay inay si rasmi ah ugu shaqeyso Dhuusamareeb, oo ah caasimada dowlad-goboleedka. Mudadaas oo dhismayaal dowladeed dib loo dayactiray, maamulka degmaduna uu sii waday shaqadiisa asagoo wali ku yimaada magacaabis ilaa 2022, markaasoo uu dowlad-goboleedku dhisay golaha deegaanka degamda Dhuusamareeb oo ka kooban 33 xubnood, taasoo qeyb ka ahayd dadaal ballaaran oo lagu dhisayey goloyaasha deegaanka oo bilowday bartamihii 2020.

Sameynta golaha deegaanka ayaa maamulka degmada ka dhigay maamul dowlad hoose oo rasmi ah, kaasoo xubnaha goluhu ay doorteen duqa degmada iyo ku xigeenkiisa. Sikastaba ha ahaatee, nidaamkan cusub awood buuxda uma siin maamulka degmada uruurinta dakhliga iyo bixinta

adeegyada dadweynaha. Awoodda badankeed ayaa wali ku uruursan heerka dowlad-goboleedka, taasoo xaddideysa madax-bannaanida howl-fulineed ee dowladda hoose (Yusuf, 2024).

Iyadoo ay xaddidnaantaasi jirto, maamulka dowladda hoose wuxuu billaabay uruurinta dakhli kooban, wallow uusan ku filnayn daboolidda kharashaadka maamul ee aasaasiga ah (Yusuf, 2024). Sidaas awgeed, degmadu waxay la daalaa-dhacaysay bixinta adeegyada muhiimka ah ee dadweynuhu u baahan yihiin. Xaaladdan ma aha mid ku kooban maamulka degmada Dhuusamareeb, balse waa dhibaato guud oo ka jirta dowladaha hoose ee dowlad-goboleedya Soomaaliya, halkaasoo awoodda maaliyadeed iyo adeeg-bixintu ay wali aad ugu uruursan yihiin heerka dowlad-goboleedka.

Maamullada dowladaha hoose waxaa si weyn loogu aqoonsan yahay inay yihiin heerka dowladeed ee ugu dhow muwaadiniinta, islamarkaana ah kuwa ugu habboon ka jawaabidda baahiyaha deegaanka. Xoojintoodu waxay ahayd mid ka mid ah yoolalka muhiimka ah ee uu u taagan yahay nidaamka federaalka Soomaaliya, oo ujeeddadiisu tahay in maamulka iyo adeegga la daadajiyo loona dhaweeyo bulshada.

Iyadoo arrintaan laga duulayo, Somali Public Agenda (SPA) waxay Dhuusamareeb ka qabatay kulan furan 20-kii Diseembar 2025, oo la isugu keenay maamulka dowladda hoose iyo muwaadiniinta si ay uga wada hadlaan arrimaha muhiimka ah ee maamulka ee saameeya degmada. Kulankan wuxuu ahaa kii ugu horreeyey oo ka mid ahaa afar kulan dadweyne oo la qorsheeyay in lagu qabto Galmudug iyo Puntland (Dhuusamareeb, Koonfurta Gaalkacyo, Waqooyiga Gaalkacyo, & Qardho). Doodahaan oo ay ujeeddadoodu tahay xoojinta ka qeybgalka muwaadiniinta ee maamulka dowladda hoose, gaar ahaan marka la eego fursadaha xaddidan ee muwaadiniintu ay si toos ah uga qeyb qaadan karaan maamulka deegaankooda. Madallada noocan ah waxay sidoo kale ka qeyb qaataan kor-u-qaadista wacyiga bulshada ee ku saabsan doorka iyo waajibaadka dowladaha hoose, islamarkaana waxay dhiirigeliyaan isla-xisaabtanka.

Qormadaan koobani waxay diiradda saareysaa kulankii Dhuusamareeb oo ay ka qeyb galeen 48 qof (17 haween ah, iyo 31 rag ah) oo ka kala yimid ururrada haweenka, dhalinyarada, odayaasha dhaqanka, dadka baahiyaha gaarka ah qaba, dadka laga tirada badan yahay, culimada diinta, iyo ganacsatada. Waxaa kaloo qeyb ka ahaa Duqa Magaalada Cabdiraxmaan Cali Maxamed (Geeda-Qorow).

Kulanka ayaa socday ku dhawaad saacad iyo bar, waana la duubay. Muuqaalka waxaa laga heli karto [barta YouTube ee SPA](). Kulanka ayaa intii uu socday waxay muwaadiniintu ka hadleen arrimo kala duwan oo ay ka mid yihiin uruurinta dakhliga, bixinta adeegayda, amniga, isticmaalka daroogada, hufnaanta, isla xisaabtanka, iyo xiriirka ka dhexeeya maamulka dowladda hoose iyo muwaadiniinta.

Ka-qaybgalayaasha iyo duqa magaalada labaduba waxay qireen in tani ay ahayd dooddii ugu horreysay ee noocaan ah ee ka dhacda Dhuusamareeb, halkaas oo maamulka dowalda hoose si toos ah uu ula kulmo mawaadiniinta si looga wada hadlo arrimaha maamulka degmada. Faalladan kooban waxay soo koobaysaa arrimaha ugu muhiimsan ee looga hadlay kulanka iyo jawaabihii uu ka bixiyey duqa magaalada.

## Uruurinta Dakhliga Dowladda Hoose

Dakhliga ayaa ahaa wixii ugu horreeyey ee kulanka lagu soo qaaday, taasoo caddeyneysa xiisaha ay ka qaybgalayaashu u qabeen fahamka baaxadda dakhliga degmada iyo saameynta uu ku leeyahay bixinta adeegga dadweynaha. Sida uu sheegay duqa magaalada maamulka dowladda hoose ayaa aqoonsaday 33 ilo dakhli oo suurtagal ah bartamihii 2022 kadib markii ay degmadu yeelatay gole deegaan. Sikastaba ha ahaatee, kaliya 11 ka mida ilahaas dakhli ayaa hadda shaqeeya, taasoo u dhiganta qiyaastii saddex meelood meel ilaha guud ee dakhliga la aqoonsaday.

Ilaha hadda shaqeeya waxaa ka mid ah:

- Khidmadaha lahaanshaha dhulka
- Lacagta xaqiijinta dukumentiyada sharciyeed
- Canshuuraha gaadiidka
- Khidmadaha rukhsadda ganacsiga
- Khidmadaha bixinta shahaadooyinka dhalashada

Duqa magaalada ayaa tilmaamay in ay degmadu ka hesho ilahan lacag dhan $20,000 ilaa $25,000 qiyaastii bishii. Dakhligaas oo aad u kooban ayaa si weyn u xaddidaya awooda degmada ee bixinta adeegyo dadweyne oo waxtar leh.

Mid ka mid ah ilaha dakhliga ee muhiim ka ah ee aan wali la hirgelin waa canshuurta guryaha, taasoo degmada u noqon lahayd il dakhli oo weyn. Mar arrintan wax laga weydiiyay, duqa magaaladu wuxuu sheegay in higelinta canshuurta guryaha ay marayso meel gebogebo ah, degmaduna ay heshiis la gaartay shirkadii canshuurtaas u qaadi lahayd.

Ka qaybgalashaaya ayaa sidoo kale tilmaamay ilo kale oo dakhli oo weli aanan si buuxda looga faa'ideysan, kuwaasoo ay ku jiraan:

- Khidmadaha boorarka xayeysiinta
- Lacagta laga qaado shirkadaha marka ay waddooyinka qodaan si ay u dhigaan qalab koronto ama biyo
- Canshuuraha la saaro tiirarka korontada iyo kaabayaasha la xiriira adeegga

Duqa magaalada ayaa soo dhaweeyey talooyinkaas, isagoo xusay in canshuurahaas lagu dari doono qorshaha dakhliga degmada ee sanadka 2026.

Wuxuu kaloo si adag u sheegay in maamulka dowladda hoose uu wajahayo caqabado dhowr ah oo ay kala kulmaan dakhli uruurinta, kuwaasoo ay ma mid yihiin:

- Wacyiga dadweynaha ee canshuurta oo yar
- Dhibaatooyin farsamo oo adkeynaya hirgelinta qaar ka mid ah ilaha dakhli

Caqabadahan ma ahan kuwo ka jira keliya degmada Dhuusamareeb. Waxay sidoo kale si guud u saameeyaan dowladaha hoose ee Soomaalia. Cilmibaaris hore oo aan ka sameynay [U daadejinta cashuur uruurinta iyo adeegyada]()

bulshada dowladaha hoose ee Puntland, Galmudug, iyo Banaadir ayaa muujisay dowladdaha hoose guud ahaan in ay uruuriyaan dakhli kooban, islamarkaasana aysan awood buuxda u lahayn maamulidda qeybo kamid ah canshuuraha ku jira awoodahooda sharci.

Wasaaradaha Maaliyadda ee dowlad-goboleedyada ayaa gacanta ku haya inta badan uruurinta dakhliga oo ay ku jiraan canshuuro ay ahayd inay qaadaan maamullada degmooyinka. Inkastoo dowlad-goboleedyadu ballan-qaadeen in la xoojin doono u daadejinta uruurinta dakhliga ee dowladaha hoose, hadana balanqaadyadaas ayaa noqday kuwo aanan fulin intooda badan, tanina waxay si weyn u xadiday awoodda dedmooyinka ee adeeg bixinta.

Duqa degmada ayaa sidoo kele xaqiijiyey in dowladda hoose ee Dhuusamareeb ay leedahay miisaaniyad sanadle ah ee uu ansixiiyo golaha deegaanka, balse wuxuu qiray in dadweynuhu aysan ka qaybgal macno leh ku lahayn habka diyaarinta miisaaniyadda degmada.

## Bixinta Adeegyada iyo Baahinta Daadejinta Awoodaha

Markii ka qaybgalayaashu ay ogaadeen xaddidnaanta dakhliga billaha ah ee degmada, qaar badan ayaa garowsaday caqabadaha maaliyadeed ee haysta dowladda hoose, dakhligaasna uusan dabooli karin adeegyada aasaasiga ah ee dadweynaha sida waxbarashada iyo caafimaadka.

Ka-qaybgalayaasha ayaa is weydiiyey sababta maamulka degmadu uusan wali u qaadan masuuliyadda bixinta adeegyadaas, maadaama ay hadda maamulaan wasaaradaha dowlad-goboleedka Galmudug, inta badanna ay maalgeliyaan deeq-bixiyeyaasha caalamiga ah. Duqa magaalda ayaa sheegay inay socdaan wada-xaajoodyo ku saabsan sidii si tartiib-tartiib ah loogu wareejin lahaa maareynta adeegyadaas dowladda hoose, inkastoo habraac ahaan uusan wali dhamaaystirmin.

Iyadoo ay dhaqaale yari jirto, hadana duqa magaalada ayaa xusay dhowr shaqo oo ay degmadu qabatay, kuwaasoo ay ka mid yihiin:

- Iibinta dhul loogu talagalay xabaalo cusub oo dadweyne, maadaama qubuurihii hore ay buuxsameen
- Helidda dhul loogu talagalay in lagu shubo qashinka degmada
- Bixinta dhul loogu talagalay suuqa xoolaha

Sidoo kale, wuxuu tilmaamay in degmadu horey ugu deeqday dhul ku yaala bartamaha magaalada si looga dhiso suuq loogu talagalay ganacsatada yar yar. Suuqaas oo lagu dhisay deeq ka timid deeq-bixiyeyaasha, waa mid laga heli karo goobo ganacsi oo kiradoodu jaban tahay oo ay isticmaali karaan ganacsata aan awoodin kirada dhismayaasha gaarka loo leeyahay.

## Nadaafada iyo Maareynta Qashinka

Nadaafadda iyo maareynta qashinku waxay ka mid ahaayeen arrimaha ugu waaweyn ee ay ka qeybgalayaashu walaaca ka muujiyeen. Duqa magaalada ayaa sheegay in degmadu ay soo iibsatay gaadiid loogu talagalay uruurinta qashinka, islamarkaana ay iibisay dhul qiyaastii hal kiiloomitir ah kana baxsan magaalada oo loogu talagalay in qashinka lagu uruuriyo laguna gubo. Iyadoo ay taasi jirto, ayey ka qeybgalayaashu waxay cabasho ka muujiyeen in shirkadaha gaarka loo leeyahay ee qandaraaska lagu siiyey uruurinta qashinka ay marar badan si khaldan qashinka ugu daadiyaan gudaha magaalada, oo aysan geyn halkii loo asteeyey qashin-qubka, taasina ay khatar caafimaad oo weyn ku tahay dadka iyo xoolaha.

Waxay kaloo muwaadiniintu ka hadleen biyaha xiliga roobka fariista wadooyinka magaalada. Waxay tilmaameen in qaar ka mid ah guryaha iyo makhaayadaha ay qashinka ku shubaan biyaha socda wadooyinka, taasna ay keento in biyuhu fariistaan meelaha godan ee wadooyinka, ayna ka dhalan karto dhibaatooyin nadaafadeed iyo caafimaad dadweyne oo khatar ah.

Duqa magaalda ayaa qiray walaacyadaas, wuxuuna ballanqaaday in degmadu la xisaabtami doonto shirkadaha uruuriya qashinka hadii ay si khaldan u daadiyaan qashinka. Wuxuu kaloo xusay in dhismaha waddada weyn ee hadda socota ay leedahay nidaamka bullaacadaha iyo biyo-mareenadda, oo gacan ka geysan doona xalinta dhibaatada biyaha fariista wadooyinka.

## Walaaca Amni

Amniga ayaa ahaa arrinta ugu badan ee lagusoo qaaday kulanka. Ka-qeybgalayaashu waxay sheegeen in amni-darrada magaaladu sii kordhayso, gaar ahaan xaafadaha ku yaalla darafyada magaalada. Waxay sidoo kale maamulka dowladda hoose iyo taliska booliska ku dhaliileen in aysan shaqo fiican ka qaban dhibaatada amni ee magaalada. Dadka deegaanka ayaa soo bandhigay dhacdooyin ay ku lug lahaayeen dad xeran dareeska ciidanka dowladda, kuwaas oo taleefannada gacanta ka dhacayey dadka magaalda.

Ka-qaybgalayaashu waxay amni-darrada sii kordhaysa u sababeeyeen arrimo ay ka mid yihiin kuwaan hoose:

- Iftiin la'aan ka jirta wadooyinka magaalada
- Kormeer boolis oo aan ka jirin xaafadaha darafyada
- Iskaashiga u dhexeeya booliska iyo guddoomiyeyaasha xaafadaha oo liita
- Jawaab celinta ay boolisku ka bixiyaan wicitaannada muwaadiniinta oo gaabis ah
- Magaalada oo aan lahayn lambarka degdeg ah (emergency number)

Isticmaalka daroogada ayey muwaadiniintu sidoo kale walaac weyn ka muujiyeen, iyagoo sheegay in inta badan dadka ku lugta leh falalka dambiyada ay u badan tahay inay sidaas u sameynayaan si ay u helaan lacag ay ku iibsadaan daroogada.

Duqa magaalada ayaa caddeeyey in caqabadahan amni ay jiraan, wuxuuna carrabka ku adkeeyey muhiimadda ay leedahay xoojinta iskaashiga u dhexeeya bulshada,

maamullada xaafadaha, iyo booliska, si loo hagaajiyo amniga degmada.

## Caqabadaha Horyaalla Dowladda Hoose

Inkastoo dowladdaha hoose ay wajahaan caqabado badan oo waaweyn, haddana duqa magaaldaa ayaa ku soo koobay caqabadaha ugu muhiisan ee horyaalla degmada sidan soo socda:

- Filashada bulshada oo ka sarreysa awoodda dhaqaale ee dowladda hoose
- Fahamka bulshada ee ku saabsan qaab-dhismeedka dowladda iyo waajibaadka hay'adaha oo hooseeya, taasoo ka dhalatay firaaq maamul ee Soomaaliya ka jiray tobannaan sano.

## Metelaadda Haweenka ee Dowladda Hoose

Haweenka ka-qeybgalay kulanka ayaa soo bandhigay su'aalo ay ka qabaan heerka metelaadda haweenka ee dowladda hoose ee Dhuusamareeb. Hadda, lix haween ah ayaa ku jira golaha deegaanka oo ka kooban 33 xubnood, taas oo si weyn uga hooseysa qoondada 30% ee haweenka loo asteeyey inay ku yeeshaan hay'adaha la doorto ee Soomaaliya.

Duqa magaalada ayaa xusay in Dhuusamareeb ay leedahay toddobo xaafadood, kuwaasoo saddex ka mid ah ay maamulaan haween, halka haweenku sidoo kale yihiin ku-xigeennada guddoomiyayaasha saddex xaafadood oo kale. Sikastaba ha ahaatee, ma uusan xusin tirada saxda ah ee heerka metelaadda haweenka dhanka agaasimayaasha iyo waaxyaha kala duwan ee degmada.

## Talooyin Tixgelin Mudan

Iyadoo laga duulayo nuxurka kulanka la qabtay, talooyinkaan soo socda ayaa la soo jeedinayaa si loo xoojiyo ka-qeybgalka muwaadiniinta loona hagaajiyo maamulka dowladda hoose ee Dhuusamreeb.

1. **Abaabulka kulamo joogto ah oo u dhexeeya muwaadiniinta iyo maamulka:** maamulka dowladda hoose waa in uu si joogto ah u qabtaa doodo dadweyne oo ay ka qeybgalaan qeybaha kala duwan ee bulshada si looga wada hadlo go'aannada saameynta ku leh dadka deegaanka. Kulamada noocaan ahi waxay gacan ka geystaan dhisidda kalsoonda, xoojinta sharciyadda maamulka, iyo kobcinta iskaashiga u dhexeeya maamulka iyo dadka deegaanka.
2. **Horumarinta wacyiga amniga bulshada:** degmadu waa inay warbaahinta gudaha la kaashato sidii loo diyaarin lahaa loona baahin lahaa fariimo wacyigelin amni ah, oo ujeeddadoodu tahay ka hortagga dambiyada iyo dhiirigelinta iskaashiga bulshada iyo hay'adaha amniga.
3. **Hirgalinta lambarka degdegga ah ee degmada:** maamulka dowladda hoose waa inuu sameeyaa lambarka degdegga ah oo shaqeeya 24 saac, kaasoo u oggolaanaya muwaadiniinta inay si degdeg ah ugusoo gudbiyaan dhacdooyinka amni iyo arrimaha kaleba maamulka degmada iyo booliska.
4. **Xoojinta iskaashiga u dhexeeya maamullada xaafadaha iyo bulshada:** maamulka dowladda hoose waa inuu adkeeyaa iskaashiga u dhexeeya gudoomiyayaasha xaafadaha, booliska, iyo bulshada si wax looga qabto amni-darrada. Guddoomiyeyaasha xaafadaha waa in lagu doortaa kartida ay ku meteli karaan uguna adeegi karaan bulshada ay hoggaaminayaan.
5. **Dhisidda guddiga hormarinta degmada:** maamulka degmadu waa in uu ku dadaalaa dhisidda guddi horumarineed oo heer degmo ah, kaasoo ay ka mid noqonayaan jilayaasha kala duwan ee bulshada. Guddiga noocan ahi wuxuu gacan ka geysan karaa uruurinta dhaqaale si wax looga qabto baahiyaha hormarineed ee degdegga ah, iyadoo la tixgelinayo dakhliga xaddidan ee degmada.

## Tixraac


- *Wasuge, Mahad, and Farhan Isak Yusuf. 2021. Galmudug Reconciliation: Processes, Challenges, and Opportunities Ahead. February . Accessed March 2026. https://www.interpeace.org/wp-content/uploads/2021/02/2021-Galmudug_Report.pdf.*

- *Yusuf, Farhan Isak. 2024. Somali Public Agenda. January. Accessed March 2026. https://somalipublicagenda.org/wp-content/uploads/2024/02/SPA_Research_Report_No_13-The-formation-operation-of-local-councils2.pdf.*


*Warbixintan waa middii ugu horreysay ee lagasoo saaray afar kulan dadweyne oo taxane ah oo laga sameynayo Dhuusamareeb iyo Koonfurta Galkacyo oo katirsan Galmudug, iyo Qardho iyo Waqooyiga Galkacyo oo katirsan Puntland. Kulamadan waxaa loogu talagalay in lagu xoojiyo ka qeybgalka muwaadiniinta ee dowladaha hoose waxaana taageeray National Endowment for Democracy.*


**Somali Public Agenda**

Mogadishu Somalia

+252(0)85 8358

info@somalipublicagenda.org

<https://www.somalipublicagenda.org>

@somalipubagenda